

# MIISAANIYADDA KA QAYBGALKA EE DEGMADA BOSTON KOOBIDA NUXURKA

## WA MAXAY MIISAANIYADDA KA QAYBGALKA?

Miisaaniyadda ka Qaybgalka (PB) waa geedi socod dimuqraadi ah oo xubnaha bulshada ay si toos ah go'aan uga gaaraan sida loo kharash gareeyo qayb ka mid ah miisaaniyadda dadweynaha. Miisaaniyadda ka qaybgalka waa dhaqan sii xoojinaya dimuqraadiyadda, dhisaya bulshooyin adag, oo abuuraya si siman loogu qaybiyo khayraadka dadweynaha. Magaalooyin dhowr ah oo ku yaala maraykanka, oo ay ku jiraan New York, Chicago, Durham, Cambridge, iyo Somerville, ayaa qaatay oo hirgeliyey hababka PB si loo kordhiyo ka qaybgalka madaniga ah iyo miisaaniyadda ee dadka degaanka.


## MIISAANIYADDA KA QAYBGALKA EE BOSTON

waqtiga gu'a ee 2023. Ujeedada Xafiisku waa in uu bixiyo qodobka rasmiga ee dadka deegaanka ee boston uga qayb qaataan hannaanka miisaaniyada magalada. Iyada oo loo marayo wareegyada sanadlaha ah ee PB, Xafiisku wuxuu la hawlgeli doonaa dadweynaha wuxuuna sare u qaadayaa mashaariicda udub dhexaadka u ah bulshada si loo hormariyo sinnaanta bulshada iyo jinsiyadda

Wareegga koowaad ee PB, Dadka reer Boston ayaa door firfircoo ka qaadan doona aqoonsiga, qaabeynta, iyo hormarinta fikradaha mashruuca si wax looga qabto baahida maxalliga ah iyadoo gacan ka geysanaya haggista miisaaniyadda sanadlaha ah ee magaalada. Dadka deegaanka waxay si wadajir ah ula shaqeyn doonaan Xafiiska Miisaaniyada ka qaybqaadashada, Gudigeeda Kormeerka Dibedda, Waaxyaha Magaalada ee ay khuseyso, iyo ururada bulshada si ay gacan uga geystaan go'aminta xaq u yeelashada iyo suurtagalnimada fikradaha mashruuca ee bulshada ay bilowday..

Sanadkan ugu horeeya ee tijaabada ah, OPB iyo Gudigeeda waxay sameeyeen "Buugga Xeerarka Miisaaniyadda Ee Ka- qaybgalka" ("[Participatory Budgeting Rulebook](#)") si ay u bixiyaan qaab dhismeed dhamaystiran iyo nidaam loogu talagalay hindisahan cusub ee Boston.

## JADWALKA 1: PB WAQTIGA HABKA PB IYO TAARIIKHAHA LOOGU TALAGALAY 2024 - 2025 WAREEGGA PB



# GOORTA IYO SIDA LOO BILAAWO HANNAANKA PB



**FIKRAD  
URURINTA**  
(Jul. 2024)

Dadka reer Boston ayaa lahaan doona siyaabo kala duwan oo ay kula wadaagaan xafiiska ka qaybgalka miisaaniyada fikradahooda mashruuca. Bisha Julai, Xafiiska ayaa ka bilaabi doona magaalada ololaha ururinta fikradaha oo u furan dhammaan dadka degganka. Fikradaha waxaa lagu soo gudbin doonaa iyada oo loo marayo shabakadda internetka ee PB Portal, khadka taleefanka ee PB, laamaha

Maktabadda Dadweynaha, Aqalka Magaalada, iyo xafladaha ururada bulshada ay martigeliso.

*Iyadoo lagu saleynayo natiijooyinka wajigan koowaad, OPB waxay qiimeyn doontaa 15ka horyaal ee hortabinta u leh bulshada iyadoo la tixraacayo nooca iyo tirada fikradaha la midka ah ee ay soo gudbiyeen dadka deggaanka.*

## **Mashruuca u Qalma Iyo Shuruudaha**

Hannaanka PB wuxuu mudnaanta saarayaa fikradaha mashruuca si loo dhiso awoodda wadajirka ah ee ku aaddan arrimaha caddaaladda bulshada iyo jinsiyadda. Fikradaha mashruuca waxaa soo gudbin kara dadka deggan magaalada Boston, iyadoon loo eegin da'da, waana inay buuxiyaan shuruudaha soo socda ee u-qalmitaanka.

- Mashaariicdu waxay ku kooban yihiin kharash hal mar ah, mana abuuru jagooyin cusub oo joogto ah;
- Soo jeedinta Mashruuca waxaa ka mid noqon kara barnaamijyada, adeegyada, iyo sidoo kale kaabayaasha muuqda; horumarka tiknoolojiga ah, iyo kor u qaadista bulshada ee ku saabsan hantida dawladda ee magaalada.
  - ▶ o Mashaariicda kaabayaasha ee ku saabsan hantida gaarka loo leeyahay, gobolka, ama federaalka maaha kuwa ka mid ah mashruucaan, sida mashaariicda ku saabsan Waaxda Ilaalinta & Madadaalada (DCR) ama Hay'adda Isu-socodka Massachusetts Bay Transit Authority (MBTA).
  - ▶ o Waxaa kamid ah fikradaha mashaacrida la xiriira barnaamijyada iyo adeegyada ka jira goobaha ay magaalada ahayn.
- Fikradaha mashruuca waa inay ahaadaan kuwo suurtagal ah in la hirgeliyo, oo ay noqdaan kuwo waafaqsan nidaamka magaalada ka jira, sharciyada, qawaaniinta, iyo Xeerarka Miisaaniyadda Ka-qaybgalka; iyo
- Mashaariicda waa in ay hirgeliyaan ama maamulaan waaxda magaalada ee ay qusaayso mashruuca ama hay'ad hesha qoondaynta tooska ah ee miisaaniyadda.

**Tusaalooyinka u qalma Fikradaha:** Barnaamijyo lagu xoojinayo caafimaadka dhimirka ee dhalinyarada Boston; si loo ballaariyo internetka Magaalada ee Bilaashka ah ee WiFi si ay u gaaraan meelo badan oo dakhligoodu hooseeyo; Fasalada aqoonta dijitalka ah ee loogu talagalay dadka waaweyn si ay u bartaan xirfado cusub oo kor loogu qaado xiriirrada bulshada; Sare-u-qaadista goobaha dadweynaha iyada oo loo marayo mashaariicda kaabayaasha (farshaxanka dadweynaha, geedaha jidadka, kursiyada meelaha dadweynaha, iwm) In la kordhiyo helitaanka cunto cusub oo caafimaad leh iyada oo loo marayo barnaamijyada beeraha bulshada ama qaboojiyaha bulshada oo ay maamulaan hay'ado maxali ah.



**Tusaalooyinka aan u qalmin Fikradaha:** Bixinta mushaarka shaqaalaha dawlada si ay adeegyada u bixiyaan; Dayactirka ama kor u qaadista guri si shakhsi loo leeyahay; Ka caawinta hay'ad dayactirta goob gaar loo leeyahay oo ay ka kireysaneyso; Ka caawinta hay'adaha diinta si ay u dayactiraan xarunta quduuska ah; Kordhinta safarka basaska ama tareenada MBTA; In la kordhiyo kor joogtaynta, dabagalka, iyo tallaabooyinka kale ee si taban oo saamayn leh ku yeelanaya degaannada.



**MADASHA ARAGTIDA**  
IYO SOO-JEEDINTA  
HORUMARINTA  
(Okt. - Nof. 2024)

Madasha Aragtida, dadka deeggaanka waxay la hawl gali doonaan Waaxyaha Magaalada ee khuseeya si ay u eegaan, ugala na hadlaan, una qiimeeyaan suurtagalnimada iyo saameynta dhammaan fikradaha hoos yimaada mid kasta oo ka mid ah 15 Mudnaanta Bulshadu leedahay. Iyada oo loo marayo geeddi-socodkan, ka qaybgalayaasha Madasha waxay soo saari doonaan bayaan ay ku qeexayaan waxay soo jeedinayaan codbixiyasha sida mid kasta

Mudnaanta Bulshada u egtahay. Dadka deeggaanka ee aan ka qayb gali karin Madashahan, waxaay heli doonaan qayb khadka tooaka ah si ay u bixiyaan. jawaab-celin.

*Warqada cod bixineed ee PB oo ay ku qoran tahay 15-ka warbixin ee soo jeedinta ee ay soo saareen dadka deeggaanka ayaa waxaa dhammeystiri doona OPB iyo Guddiga iyadoo dib u eegis lagu sameynayo laguna darayo warcelinada internetka ee khuseysa.. Xafiiska iyo Waaxda magaalada ee ay khuseyso ayaa samayn doona qiimeyn kama dambays ah oo suurtagal ah waxayna go'aamin doonaan kharashaadka qiyaasta ah ee hindisaha kasta ee cod-bixinta.*



**CODEYNTA,**  
MAALGELINTA  
MASHRUUCA, IYO  
HIRGELINTA  
(Jan. - Feb. 2025)

U codaynta talo soo jeedinta miisaaniyada ka qayb-galka ah waxay ku dhici doonaan si qof iyo Khadka tooska ah. Codbixinta PB-da, dadka deggan Boston oo da'doodu tahay 11 jir (ama fasalka 6aad) iyo wixii ka wayn waxay awood u yeelan doonaan inay doortaan ilaa shan (5) wadar ahaan 15 soo-jeedin, oo midkasta oo leh qiyaasta dollarka lagu qiyaasay. Soo jeedinta leh codadka ugu badan ayaa la guddoonsiin

doonaa, ilaa maalgelinta xadiddan ee wareegtada PB. Magaalada iyo OPB ayaa ku dhawaaqi doona hindisaha ku guuleystay natijada ugu dambaysa ee codbixinta. Hirgelinta mashaariicda waxaa indha indhayn doona OPB iyo Waaxyaha magaalada ee ay khuseyso.



## LA XARIIR XAFIISKA MIISAANIYADDA KA QAYBQAADASHADA

ma rabtaa inaad ka qayb qaadato? Fadlan soo gaadhsii Xafiiska Miisaaniyada Ka-qaybgalka!

Mareegta: [www.boston.gov/participate](http://www.boston.gov/participate)

Iimaylka: [pb@boston.gov](mailto:pb@boston.gov)

